# Xus Qaran

**W/Q: Cabdullaahi Janno**
**June 15, 2015**

---

Daafaha dunida, magaalo walba, degmo walba, xaafad walba …waa dabaal-deg iyo damaashaad.  Waa u farxad iyo reynreyn Soomaalida.  Waa calamo lulanaya iyo ciid qaran. Waxaa goobta cammiray dhallinyaro jidbeysan oo xiran funaanado uu ku sawirnaa calankii buluugga ee xiddigta cad dhexda ku lahaa.  Kuwo kalena calanka qudhiisa ayayba huwanaayeen.  Waxaa socday qudbooyin gumeysi-diid iyo xuska geesiyaashii soo halgamay. Waxaa yimid fannaaniin iyo abwaanno dadkii ku asqiyay murti iyo madadaallo aan kala go' laheyn.  Waa xuskii Kowda Luulyo—iyo xafladdii madaxbannaanida Soomaaliya.



Fagaare ku yaallay xaafad ka mid ah dalka Ingiriiska ayaa waxaa munaasabadda Kowda Luulyo lagu casumay madax iyo marti ka kala socotay jaalliyadda Soomaalida iyo dawladda dalka Ingiriiska.  Marti-sharaftu waxay harsanayeen gudaha teendho cad oo waasac aheyd.  Kuraasta ay ku fadhiyeen waxaa hor yaallay miis dheer oo la dul saaray ubaxyo, calamo yar yar, iyo caagado biyo qabow ku jireen.

Barre waa wiil todobiyo toban jir ahaa, kuna dhashay dalka Ingiriiska.  Waxaa xafladda keenay aabbihiis si uu wiilku wax uga ogaado taariikhda dalkii awoowayaashiisa. Wuxuu Barre isha la raacayay ajandihii xafladda.  Wuxuuna dhageystay oo u kuur galay qudbadihii kala duwanaa ee goobta ka dhacayay.  Saacado ka dib, xafladdii waa lagu kala tegay.

Barre iyo aabbihiis waxay soo raaceen baskii guduudnaa ee labada dabaq lahaa.

"Haye, Barre," ayuu yiri Abbihii wiilka. "Sidee u aragtaa xafladdii maanta?"

"Caadi ma aheyn," ayuu yiri Barre oo muusoonaya. "Waan ku heystay."


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“Qoraal ka diyaari,” ayuu yiri aabbihii wiilka oo isaguna muusoonaya. “Kuna soo daabac joornaalka iskoolkaaga, oo ciyaalka iskoolka kula dhigto ugu faan taariikhdaada.”

“Horta aabbe su’aal?” ayuu yiri Barre oo u soo jeesanaya dhankii aabbihiis.

“Oo ah?” ayuu yiri aabbihii.

“Aabbe Soomaaliya xor miyaa?” ayuu yiri Barre.

“Maxaad sidaa ku tiri?” ayuu yiri aabbihii oo indhaha yuruuriciyay.

“Ma aqaan,” ayuu yiri Barre, “laakiin teleefishinka mar walba waxaan ka arkaa wararka AMISOM oo dhul cusub ka xoreynayso Shabaab. Haddana waxaan maqlaa maamul-goboleed hebel iyo maamul-goboleed hebel waa col iyo Itoobiya ayaa dhexdhexaadinayso. Misana waxaan maqlaa hawada diyaaradaha Soomaaliya waxaa laga maamulaa xafiis UN-ta oo Nayroobi ku yaallo. Misana waad og tahay Soomaaliya ma lahan hal xafiis oo boosto ah—xasuuso ciiddii hore waxaan waayay boosto aan haddiyad ugu diro ina abtigeey joogo Soomaaliya.”

“Waa su’aalo aad daliishooda keentay,” ayuu yiri aabbihii wiilka oo neef weyn soo tufaya, “hayeeshee bal jawaabta adigu raadi.”

Barre baaskiil ayuu ka dhakoolay. Boorso ayaa dhabarka u saarneyd. Wuxuu soo galay masjid ay Soomaalidu maamushay. Xafiis ay kutubo badan dhex yaalleen ayuu sii galay. Waxaa dhex fadhiyay oday qabay dhar wada cad, duub cadna uu madaxa ugu xirnaa. Tusbax ayuu ku werdinayay. Wuxuu ahaa imaamkii masjidka—wayna isa salaameen.

“Magaceygu waa Barre,” ayuu yiri wiilkii, “hal su’aal ayaan jeclaa inaan ku weydiiyo.”

“Adduun su’aalo badan dheh, oo misana jawaab yar,” ayuu yiri Imaamkii oo tusbaxiisa hadba hal sii deynaya. “Soo fadhiiso. Su’aashu waa maxay, wiilyahow?”

“Sheekhow waxaan maalin hore ka qeyb galay,” ayuu yiri Barre, “xaflad lagu maamusaayay xuska Kowda Luulyo. Ishaydu ma aysan qaban culimo ka socotay masaajidda. Haddaba ma waxaa jiro sabab u diiday in ay culimadu ka qeyb gasho munaasabaddii Kowda Luulyo?”

Waxaa muusooday Imaamkii.

“Bismillaahi,” ayuu Imaamkii hadalka ku billaabay. “Su’aashaadu waa su’aal aad u fiiro dheer. Jawaabta haddii aan kuu soo koobo, qofka Muslimka ah ficilkiisa wuxuu ka fiiriyaa in uu Eebbe u dhaweynayo ama ka fogeynayo. Munaasabadda Kowda Luulyo haddii la yiraah taariikh ahaan ayaa la isku xasuusinayaa, su’aashu waxay tahay qaabkee?”

Barre wuxuu qalinka ku boobayay ereyadii Imaamka.

“Qaabka ay hadda u dhacdo,” ayuu yiri Imaamkii, “xafladdan waxay ku tumutaa Xudduudaha Sharciga Eebbe Weyne.”

“Sidee, macnaha?” ayuu la soo booday Barre oo indhaha galka ka bixiyay.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“Waa marka koowaadee waxaa lagu banneystaa isdhexgalka rag iyo dumar,” ayuu yiri Imaamkii. “Labo, waxaa badata dayacaadda salaadaha oo dad badani ay haleeli waayaan. Saddex, waxaa la sii xayeeysiiyaa in ay imaan doonaan fannaaniin dhallinta habeenkii ku dhafriya tumasho iyo fisqi. Muslimku waa inuu isweydiiyo, meel ay waxaas ka dhacayaan Ilaah ma kuu dhaweynaysaa? Muslimkii haa yiraahdo, naftiisaa been u sheegtay. Haddii ay jawaabtu maya noqoto—wayba tahaye—meel aan Ilaah kuu dhaweynaynin culimo ma soo xaadirtaa? Malaa'igi ma soo xaadirtaa?”

Imaamkii tusbaxiisii ayuu qoorta surtay. Barre wuxuu qoranayay jawaabtii Imaamka.

“Ogow,” ayuu yiri Imaamkii oo indhaha isku qabsanaya qushuuc awgii, “annagu waxa aynu nahay Muslimiin. Waxaa tix-raac inoo ah Quraanka iyo Sunnada Suubanaha, sallallaahu calayhi wasallam. Waxaa Muslimka loo sharciyeeyay labo ciidood oo waaweyn: midda Ramadaanka iyo midda Xajka. Munaasabadda ama ciidda Kowda Luulyo waa arrin qalaad, oo asalkeeda nooga timid reer galbeedka.”

“Laakiin weligey ma maqlin cid diiday xuska madaxbannaanida dalka,” ayuu la soo booday Barre. “Culimada kale ma kula qabtaa fikraddaan?”

“Subxanaallaah!” ayuu yiri Imaamkii oo muusoonaya. “Goormaan ku iri fikraddeyda ayaan ka hadlay? In Muslimka ay labo ciid leeyihiin waa Xaddiis, ee fikirkayga ma ahan. Tan kale haddii aan dhanka waaqaca adduunkan kaa tusaaleeyo, dalal badan oo gumeysi soo maray maba xusaan madax-bannaani iyo huuhaadaas. Qaarna wayba inkiraan in la gumeystay sida Itoobiya oo inkirto in uu Talyaanigu gumeystay. Haddaba yaan u faannaa? Maxaanse ku faannaa? Ma in gumeyste na dulmiyay?”

“Aad baad u mahadsan tahay,” ayuu yiri Barre oo isku laabaya buuggiisii.

“Soo dhawoow,” ayuu yiri Imaamkii oo muusoonaya. “Soo dhawoow, wiilyahow.”

Wuxuu Barre joogay iskuulkiisa, kuna jiray xiisaddii taariikhda. Markii ay u dhammaatay xiisaddii ayuu ku haray fasalka si uu u wareysto Macallinkiisa taariikhda oo lagu naaneysi jiray Mr. Fox.

“Mr. Fox,” ayuu yiri Barre, “waxaan maalin hore aaday munaasabadda madaxbannaanida Soomaalida. Waxaa igu soo dhacday hal su’aal.”

“Su’aal noocma ah? Soo daa,” ayuu yiri Mr. Fox oo sabuuraddii tirtiraya.

“Waxaad bil ka hor noo dhigtay,” ayuu yiri Barre, “cashar ka hadlayay in England hadda ka hor lagu soo duulay dhowr jeer, oo ay qabsadeen qowmiyado hore sida kuwa Noormaanka iyo Faransiiska—iyo weliba Luuwis oo ahaa wiilka boqorka Faransiiska inuu qabsaday oo ka talin jirayna magaalada London.”

“Waa runtaa,” ayuu yiri Mr. Fox oo isku toostoosisanayo waraaqo miiska ku raseysnaa.

“Haddaba maxay ku dhacday,” ayuu yiri Barre, “in waddanka Boqortooyada Ingiriiska uusan u dabbaal degin xornimo iyo madax-bannaani haddii horay loo qabsaday?”


Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved

“Hehehe,” ayuu yiri Mr. Fox oo qoslaya. “Wiilyahow goormaad fahmaysaa Boqortooyada Ingiriiska? Xadaaradda adduunka ayaynu kaalin weyn ku leennahay. Mar waxaa na soo martay aynu noqonnay dawladda keliya uusan calankeedu qorraxda u dhicin. Haatan oo qarniga kow iyo labaatanaad lagu jirana luuqaddeenna Ingiriisiga ahi waxay noqotay luuqad aysan qorraxdu u dhicin. Ku darso oo, sanad walba dalal badan ayaa na xuso—hehehehe!”

Barre qalinka ayuu ku boobayay buuggii uu sitay.

“Sidee marka noogu cuntameysaa,” ayuu yiri Mr. Fox oo ookiyaalihiisa masaxayo, “in aan xusno munaasabad madaxbannaani ah annagoo Reer Boqor ah? Siyaasad ahaan, soo ma ogid markaad xustid madax-bannaani inaad taariikh u sameyneysid dalkii iyo dadkii ku gumeysan jiray? Taa waynu iskala qab weynahay haddaynu nahay Boqortooyada Ingiriiska, hehehe.”

Waxaa yeeray gambaleelkii iskoolka. Barre inta buuggiisii isku laabay ayuu dhankii iridda u jiheystay, oo yiri, “Mahadsanid, Mr. Fox.”

Maalin Sabti aheyd oo iskoolku xirnaa ayuu Barre suuqa soo aaday. Wuxuu soo galay xafiiska nin xawilaad heystay oo qaraabo la ahaa oday ka mid ahaa ururkii halgamayaashii SYL. Wuxuu ninkaasi ku jiray raggii ka qudbeynayay xuskii Kowda Luulyo. Waxaa miiska u saarnaa kombiyuutar, telefoonka xafiiska, qariiradda adduunka oo banooni kuusan aheyd, iyo qalimaan iyo waraaqo. Dhabarkiisa waxaa ku raseysnaa buugaag ka hadlaya ganacsiga, bangiyada, iyo sharciyada ganacsiga adduunka.

“Mudane,” ayuu yiri wiilkii oo gacanta soo taaganaya. “Magaceygu waa Barre.”

“Soo dhawoow,” ayuu yiri Xawilaadlihii oo kursiga ka kacay si uu u salaamo wiilka.

“Mahadsanid,” ayuu yiri Barre oo fadhiisanaya, “waxaan ka qeyb galay xafladdii Kowda Luulyo. Waxaan su’aal ka qabay hadalkaagii qudbadda ee aad laheyd yoolka xawilaaduhu waa inay Soomaaliya gaarsiiyaan madaxbannaani dhaqaale.”

“Haa, sax,” ayuu yiri Xawilaadlihii.

“Haddaba su’aashaydu waxay tahay,” ayuu yiri Barre, “Soomaalidu miyeysan hadda heysan madaxbannaani dhaqaale?”

Waxaa neef weyn soo tufay Xawilaadlihii.

“Guud ahaan,” ayuu yiri Xawilaadlihii oo farta ku fiiqaya qariiraddii miiska u saarneyd, “waddamo badan oo ay Soomaaliya ka mid tahay ayaa waxaa muuqaal ahaan uga kacay gumeystihii—oo ciidankiisii kala baxay. Hayeeshee wuxuu ka hagraday—kana hor istaagay—cilmi iyo xirfad ay kaga kaaftoomaan isaga. Meelaha uu gumeystuhu weli ku dheggan yahay waxaa ka mid ah ilaha dhaqaale, oo curyaamiyay dalalkii uu ku soo duulay.

“Hal tusaale oo kooban iga hoo: wuxuu gumeystuhu furtay bangiyada IMF iyo World Bank si ay dhaqaale ahaan cadaadis u saaraan dalalka dan yarta ah. Waxaa firgasho uga baxsaday dalal faro-ku-tiris ah sida Indooniisiya oo fahantay gumeysiga dhaqaale. Marka


Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved

maya, Soomaaliya weli ma aysan gaarin xornimo dhaqaale inkastoo uu gumeystuhu la baxay ciidankiisii. Horaa loo yiri, '*Ayax tag, eelna reeb*.'"

"Aad baad u mahadsan tahay, Mudane," ayuu yiri Barre oo buuggiisii isku laabayo.

"Soo dhawoow," ayuu yiri Xawilaadlihii oo muusoonaya.

Barre wuxuu dusha uga booday baaskiilkiisii. Wuxuu wejiga soo aaddiyay dhankii uu ku yaallay xafiiska jaalliyadda Soomaalida. Waxaa isla durbadiiba xafiiska ku qaabbilay hoggaamiyihii jaalliyadda oo ka mid ahaa raggii qudbadda ka jeediyay xafladda Kowda Luulyo.

"Haye," ayuu yiri Agaasimihii jaalliyadda, "soo dhawoow, adeer. Soo gudub."

"Mahadsanid," ayuu yiri wiilkii oo gacanta soo taaganaya, "Magaceygu waa Barre. Waqti badan kaama qaadanayo, oo hal su'aal ah ayaan qabaa."

"Soo daa," ayuu yiri Agaasimihii, "diyaar."

"Waxaa i soo jiitay," ayuu yiri Barre oo buuggiisa kala furanaya, "hadal aad ka jeedisay xuskii Kowda Luulyo. Hadalkaagii ahaa in shacabka Soomaaliyeed iyo dawladda Ingiriiska ay ka dhaxeyso saaxiibtinimo fac weyn oo soo jireen ah—isla markaana waxaa qudbadihii la akhriyay lagu xusay in Boqortooyada Ingiriiska ay gumeysatay Soomaaliya. Su'aashaydu waa: gumeyste saaxiib ma noqdaa?"

Hal mar ayaa agaasimihii waxaa ka haaday burjigii. Su'aashii ayaa ku ridday anfariir, filanwaana ku noqotay.

"Haayoo," ayuu yiri Agaasimihii oo fara-naxsan, "een, haa, saaxiibtinimada, haa, een waxay dhalanaysaa markii waddankii wax gumeysan jiray uu madaxbannaani ku siiyo, sida wax loo maamulana ku baro, wasaarado iyo mashaariic qaran kula dhiso, deeq waxbarashana siiyo dhallintaada oo dibadda ugu qaado tababar."

"Mahadsanid," ayuu yiri Barre oo buuggiisa isku laabanaya.

"Adaa mudan," ayuu yiri Agaasimihii oo qarsanaya dhidid ka soo daatay farihiisa. "Wax su'aal kale ma qabtaa?"

"Haa," ayuu yiri Barre oo ka faa'iideysanaya fursaddan. "Ma run baa in munaasabadda Kowda Luulyo ay ka hor imaneyso Diinta Islaamka—oo ay tahay ku dayasho lagu dayanayo dhaqamo aan Islaam aheyn?"

Agaasimihii indhaha ayuu galka ka bixiyay—caroodayna. Oo kalsooni muujiyay.

"Yaa hadalkaas kugu yiri?" ayuu yiri Agaasimihii.

"Waxaan soo maray masaajid ku yaalla xaafaddan," ayuu yiri Barre.

"War wadaaddadaan way iska hadlaan," ayuu la soo booday Agaasimihii, "adduunkana lama socdaan."


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

Barre inta u mahadnaqay Agaasimihii ayuu baxay, oo baaskiilkiisii dhakada ka fuulay.

Maalinkii Isniintii aheyd ayuu Barre sida caadadu aheyd u kallahay dugsigii sare. Markuu xiisaddii saddexaad ka soo baxay ayuu soo maray Macallimad Soomaali aheyd oo iskoolka ka dhigto maaddada xisaabta. Wuxuu ku leexday xafiiskeeda—oo uu isbaray Macallimaddii.

"Waxaan qabay su'aal," ayuu yiri Barre oo la kala baxaya buuggiisa. "Waxaan ka qeyb galay xafladdii Kowda Luulyo, waxaan rabay inaan ogaado guud ahaan waa sidee dareenka dadka Soomaaliyeed? Ma u wada ciidaan munaasabadda Kowda Luulyo?"

Waxaa dhoollacaddeysay Macallimaddii—isagana u fasaxday inuu ku fadhiisto kursi xafiiskeeda dhex yaallay.

"Horta aan ku hormaree Soomaalida maanta waa dad wado xaflado badan," ayay tiri Macallimaddii oo xusullada dul saareyso miiskii hor yaallay. "Calamo badanaa! Ciido badanaa! Maamullo badanaa! Gobol gobol! Degmo degmo! Tuulo tuulo! Buul buul! Calanka midkaan iyo calanka midkaas! Iyagaa isku mashquulsan, oo qori iyo hub u qaatay in midba uu midka kale dhul iyo deegaan kula dagaallamo—oo kaaga daranee ay isu arkaan inay gobonimo-doon yihiin, xaqna ku taagan yihiin."



Barre qalinka ayuu ku boobayay hadalkii Macallimadda.

"Taa waxaa inoo sii dheer," ayay tiri Macallimaddii, "waxaa haatan na soo dul degay ciidamo iyo xafiisyo aysan shacabka Soomaaliyeed talo ku laheyn. AMISOM ha dhihin, sirdoon shisheeye ha dhihin, al-Shabaab ha dhihin, Itoobiya ha dhihin, NATO ha dhihin, calooshood-u-shaqeystayaal dhuumaaleysta ha dhihin. Intaas oo dhanna waxay si toos ama si dadban dalka iyo dadka Soomaaliyeed uga xayuubiyeen inay tashtaan oo aayahooda hantaan—taasina waa gumeysi."

Macallimaddii il-biriqsiyo ayay hakatay—sidii inay baadi-goob ugu jirto hadalkii ay oran laheyd. Barre wuu eegayay. Oo aamusnaa. Qalinkana ku dul hayay buuggiisa.

"Nasiib-darro," ayay tiri iyadoo yaxyax madaxa hoos ula ridaneysa, "isla gumeysigaa ayay dadku ka qabaan dareen kala duwan—oo qaar ayaa gumeysiga cad iyo kan madowba u arko saaxiib iyo xabiib. Taasina waxaa ugu wacan hoos u dhaca ku yimid qiiradii waddaninimo iyo qabkii Soomaalinimo. Sidaa awgeed, haddii aan ka jawaabo su'aashaada, runtii ma jiro dareen mideysan oo ku aaddan xafladda Kowda Luulyo. Bil caksi, dhallinta soo koreyso waxaaba lagu ababiyaa xuska maamul-goboleedyada ay ka soo jeedaan oo maamul kasta gooni loo xuso sanad walba."

Macallimaddii madaxa ayay luxday—Barrena ereyo ayuu hoosta ka xarriiqayay.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“I maqal,” ayay tiri, “Soomaalidu haddii ay rabto ha u dabaaldegto Kowda Luulyo. Xaqiiqduse waxay tahay weli lama helin madax-bannaani buuxdo oo dhab ah. Xaqiiqdu waxay tahay, madaxbannaani dhab ah waxaa la sheegan karaa maalinkii ay Soomaalidu ku heshiiso hal mabda’, hal calan, hal qaran, iyo hal dastuur. Madaxbannaani dhab ah waxaa la sheegan karaa maalinkii ay Soomaalidu kursi joogto ah ku yeelato Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay—oo codkooda laga heybaysto. Intaasoo dhanna waxaa ka horreeyo in la helo madaxbannaani xor laga yahay qabyaaladda iyo han-yarida maadaama ay labadani qeyb weyn ka qaateen in calankeennu uu magan u noqdo ciidanka AMISOM iyo caqliga daneystaha shisheeye.”

Barre wuxuu rogay baalasha xaashiyihii uu wax ku qoranayay—oo boobsiis qalinka hadba gees ka gees la raacayay sadarrada buugga.

“Mar aan wareystay hoggaamiye magac ku leh Soomaalida London,” ayuu yiri Barre, “wuxuu gumeysigii Soomaaliya ku tilmaamay saaxiib fac weyn—qaasatan ka dib markii uu gumeystihii ka kacay dhulalkii uu heystay. Taa ma ku raacsan tahay?”

“Dabcan iskuul waad dhigataa,” ayay tiri Macallimaddii. “Waadna ogtahay inuu jiro xoogiiste dhibo ardayda tabarta yar. Oo handado. Oo baad ka qaado. Ama bugobugeeyo?”

“Haa,” ayuu yiri Barre oo wejigiisa caro laga dheehan karo. “Waan nebcahay. Anigay i dhibeen.”

“Adiga oo neceb xoogiistaha,” ayay tiri Macallimaddii, “mar mar ma u cammirtaa si aad shartiisa uga badbaaddid?”

Barre wuu muusooday.

“Waa sidaasoo kale,” ayay tiri Macallimaddii. “Xiriirka saaxiibtinimo ee u dhaxeeyo gumeystaha iyo dalalka tabarta yar ee la dulmiyay—waa mid salka ku hayo waan kaa xoog badnahay ee car wax iga sheeg. Tan kale, sidee buu saaxiib fac weyn u noqdaa gumeyste dhulkii Soomaalida qeyb siiyay Itoobiya, qeybna Kenya—oo nagu sameeyay ballan-fur?! Ogowna gumeystaha na dulmiyay kuma eko Ingiriiska keliya. Waxaa labeeyo Talyaaniga—Faransiiskuna uu saddaxeeyo.”

“Waad mahadsan tahay,” ayuu yiri Barre oo buuggiisa isku laabanaya.

“Soo dhawoow,” ayay tiri Macallimaddii.

Wuxuu Barre joogay gurigiisa. Wuxuuna soo fadhiistay qolkii fadhiga. Aabbihiis ayaa joogay, oo teleefishin daawanayay. Wuxuu odaygu wiilkiisa weydiiyay meesha ay u mareyso warbixintii uu ka diyaarinayay xuska Kowda Luulyo. Wuxuu Barre aabbihiis u sheegay in uu soo gabagabeeyay baaritaankiisii.

“Hambalyo! Hambalyo!” ayuu la soo booday aabbihiis. “Waxaan sugnaaba waa adigoo joornaalka iskoolka ku soo daabaco warbixintaas.”

“Aabbe taas xiiso uma qabo,” ayuu yiri Barre oo madaxa hoos u roganaya.

“Oo waayo?” ayuu yiri aabbihii oo si' u eegayo wiilkiisa.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“Taariikhda ay Kowda Luulyo u taagan tahay iyo waaqaca dalka Soomaaliya ee maanta isma lahan,” ayuu yiri Barre.

“Kuma fahmin,” ayuu yiri aabbihii.

Barre inta madaxa kor u soo qaaday ayuu aabbihiis eegay. “Aabbe Soomaaliya xor ma ahan,” ayuu yiri. “Nin xor ah ayaa xus qaran u dabbaaldego. Soomaaliyana xaflado uma baahnee waxay mudan tahay inay dib u hanato xorriyaddeeda.”

Aabbihii inta madaxa luxay ayuu neef weyn soo tufay. Intuusan aabbuhu hadal kale oran ayuu Barre u dhaqaaqay dhankii jikada. Koombo cabitaan aheyd ayuu kala soo baxay qaboojiyihii.

~Dhammaad~

Cabdullaahi Janno
Kala xiriir qoraaga: claahijanno@gmail.com

Ama facebook.com/Cabdullaahijanno

------

F*.G.: Sheekadan waxay ka mid tahay 13 sheeko oo gaagaaban kuwaasoo uu qoraagu buug ku ururiyay, soona daabici doono bisha Ramadaan ka dib iyo magaalada Minneapolis, Alle idinki*.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**